

Afkeenu Hodansanaa, Ummadiisuna hiil yaraa

Wareysi: Barre Sare Maxamed Bulaale

Han-weynidu yaab lahaa Hilbay nacaysaa ag yaal

Hibaaqa hareerigee Haadaan ka lushee fogbay

Misana ku hadaaqaysaa, Hal bay hal ugeynaysaa

Hal baanay ka goynaysaa Hadhaa hal ka buuran bay

Misana kugu hawlaysaa, Go'doon iyo hayjad bay

Habeen kugu oodaysaa Huluul laga maagay bay

Hayaan kugu geynaysaa

Maansada Higil, Abwaan Xasan Daahir Ismaaciil (Weedhsame)







Maarso 14,2012

Af-Soomaaliga ayaa ah af leh hodantinimadiisa. Ummada adeegsata waxaa looga yaqaanaa aduunweynaha ummadii gabayga (Poet Nation). Gu'gii 1952^{kii} ayaa boqorada Ingiriiska aabaheed uu geeriyooday. Gu'gii 1953^{kii} ayaa wadamadii uu gumaysan jiray Ingiriisku laga codsadey inay soo bandhigaan murti maanseed ay kaga qayb galaan baroordiiqda loo samaynayo boqorkaa iyo celeemo-saarka loo samaynayo inantiisa. Dhinaca wadanka Soomaliland waxaa uga qayb galay kooxdii Boys'scouts oo uu dadkii sii galbiyey ka mid ahaa Cumar Ustareeliya (IHUN). Markii la tagey goobtii baroordiiqda iyo caleemo saarka iskugu jirtay ayaa dadweynihii gacanta laga galiyey maansadii uu tiriyey Cali Jaamac Haabiil (IHUN) ee baroordiiqda aheyd "geeridii Xirsay sheegayaan" oo loo aftebiyey Afka Ingiriisiga. Waxaana cod baahiyaha qaatey oo maansadaa akhriyey Cumar Ustareeliya. Maansadaasi waxay noqotay maansadii hanatey dhamaan dadweynihii madasha joogay, loona doortay inay tahay xulkii maansooyinka ee maalintaa.

Sidoo kale ayaa bishii Diisamber 15^{dii}, 2003^{dii} Jaamicad ku taala magaalada Lund ee wadanka Sweden lagu soo bandhigay tartan maanseed loogu magac darey "Xulkii Gabayada Caalamka ee labaatankii sano ee tegay". Waxaa kaalinta koowaad gashay maansada "Dalxiis iyo Darmaan" ee uu tiriyey Cabdi Aadan Qays kuna galay diiwaanka aduunka. Tirada gabayada madashaa lagu soo bandhigay ayaa ahaa 150 maanso oo laga soo ururiyey dunida oo dhan, laguna afceliyey shan ka mid ah afafka aduunka.

Wuxuu haddaba maanka toosani diidayaa in la yeelo ummada heerkaa aduunka kaga jirta ayaan afkeedu la jaanqaadeyn horumarka aqooneed ee laga gaadhey dhinaca eray-bixinta.

Muddo dheer ayaa hawsha qorista Af-Soomaaliga gacanta lagu hayey. Muddadaa dad badan ayaa ka hawlgaley soona bandhigay siday wax u arkayeen iyo farta ay door bideen in la qaataba. Dadkaa qaarkood waxay soo bandhigeen far ay iyagu dhidibada u taageen, halka raac kale ay soo jeediyeen talooyin ku aadan qaab dhismeedka farta Soomaaligu siday u eekaanayso ama noqonayso.

FAR SOOMAALI	FAR SOOMAALI	FAR SOOMAALI
1) <u>SHIBBANE</u>	2) <u>FURAHA</u>	3) <u>CODADKA</u>
B T J X KH	x . Xiddig 	<u>SHAQAL GAABAN:</u>
D R S SH DH	c . Calan 	A - a : Arday
C G F Q K L	q . Qaanso 	E - e : Ey
M N W H Y	sh . Shimbir 	I - i : Ii
b t j x kh	dh . Dhalo 	O - o : Orgi
d r s sh dh	kh . Khad 	U - u : Ui
c g f q k l		<u>SHAQAL DHEER:</u>
m n w h y		AA - aa : Baal
		EE - ee : Gees
		Ii - ii : Wiil
		OO - oo : Loox
		UU - uu : Suun

Qoraaga caanka ah ee Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo oo arintaa ka hadlayana wuxuu qalinka ku duugay: “Ka hor 21^{kii} Oktoobar ee 1972^{kii}, dad badan oo Soomaali iyo shisheeyaba leh baa isku hawlay sidii af Soomaaliga loo qori lahaa. Ha ugu horreeyo Sheekh Yuusuf Al-kawniin oo ah ninkii bilaabay Alif la kordhabey

iyo kuwii faraha badnaa ee ka dambeeyey, haddii aan qaar ka xusana, ay ka mid ahaayeen Muuse X.I. Galaal, Cismaan Keenaddiid, B. W. Andrzejewski, Maxamed Cabdi Makaahiil, Shire Jaamac Axmed, Ibraahim Xaashi Maxammuud, M. M. Moreno, C. R. V. Bell, L. E. Armstrong, Cabdullaahi Xaaji Maxammuud, B. Panza, iyo Cabdiraxmaan Sh. Nuur” (Barwaaqo, 2003).

Hase yeeshee gu’gii 1972^{kii} ayey suurtagashey in qalinka lagu duugo go’aankii qorista Af-Soomaaliga. Waxaa la qaadey olole lagu gaadhsiinayo fartaa daafaha ay degaan dadka Soomaaliyeed gaar ahaan dalalkii la isku odhan jiray Soomaaliya. Ololaha waxaa ka qayb qaatey dhamaan ardeydii iyo macalimiintii. Waxaa si loo hirgaliyo fartaa lagu hawlgaley halku-dheg ahaa “**Haddaad taqaan bar, hadaanad aqoonna baro**”. Waxaa kaalin mug laheyd qaatey wasaaradii warfaafinta oo ku hawlgashey dhamaan hababka kala duwan ee gudbinta sida idaacadaha, golayaasha murtida, wargeysyada qoran iwm. Ololahaasi wuxuu socday laga bilaabo 1973^{kii} ilaa 1975^{kii}.

“Oktober 1972^{kii} Golahii Sare EE Kacaanka ayaa meelmariyey in Af Soomaaliga lagu qoro farta Latinka. Taa haddii la go’aamiyey, lama huraan ayey noqotay in farta lagu shaqaynayaana ay noqoto Soomaali. Sidaas darteed, waxa la faray dhamaan shaqaalaha dawladda in muddo bil gudaheed ah ay dhamaan ku bartaan qorista iyo akhrinta farta Soomaaliga. Go’aamada Kacaanku dhaqangelin mooyi e ma lahayn faallayn iyo qiimayn waqti qaata. Sidaas darteed, haddii bishii ay dhamaatay, wasaarad waliba shaqaalaheedii ayey imtixaan ka qaaday lagu sugayey in ruux waliba uu gacanta ku

dhigay qorista iyo akhriska farta cusub” ayuu yidhi Barre sare Maxamed Bulaale oo u waramayey bahda mareegta Farshaxan.

Abwaan Xasan Sh.Muumin (IHUN) oo ka mid ahaa dadkii halganka dheer ugu jiray in la dhawro lana kobciyo Af- Soomaaliga ayaa u soo dhaweeyey hawshan soo afjarantay. Abwaan Xasan Sh.Muumin (IHUN) ayaa taariikhda ku galiyey dhacdadaa qaab maanseed, waxaanu yidhi:

<i>Qumaati uga bogoo</i>	<i>Fartii qalaad ha moodin</i>
<i>Carrabku qaldi maayee</i>	<i>Sidii caanaha qudh-qudhiya!</i>

<i>Murtideenii quusatee</i>	<i>Qaawanayd quruxsanaa</i>
<i>Sumadda loo qalqaaliyee</i>	<i>Lagu qorey qummanaa</i>
<i>Maantuu qabweyn iyo</i>	<i>Qosolku ii xalaal yahayoo</i>
<i>Maanku iqaboobayaa</i>	<i>Qalinkaaga ii dhiib!</i>

<i>Ereyada an kuu qoro</i>	<i>Qumaati uga bogo</i>
<i>Fartii qalaad ha moodin</i>	<i>Carrabku qaldi maayee</i>
<i>sidii caanahii qudh-qudhiya</i>	<i>Sidii caanahii qudh-qudhiya</i>

Abwaan Xasan Sheekh Muumin, 1972

Mudadii bisha aheyd ee loo qabtey shaqaalaha dawlada si guul leh ayey u dhamaatey. Waxay muujiyeen shaqaalihii dawlada karti iyo dadaal ay hageysay cabsi ay ka qabeen in shaqada laga eryo. Markii taasi si fiican u hirgashay ee ay guul ku dhamaatey ayaa waxaa bilaabmay hawlgalkii labaad oo ahaa in dhamaan waxbarashada dalka wax lagu barto farta Soomaaliga. Afafkii qalaad ee dalka la odhan jiray Soomaaliya wax lagaga baran jiray xilligaa ayaa kala ahaa Ingiriisi, Carabi iyo Talyaani. *“Imtixaanka hortii Guddigii Far Qorista ayaa diyaarisay habraacyo la akhriyo lagana arko xarfuhu waxa ay yihiin (shibanyaal iyo shaqalo). Markii ku shaqaynta farta Soomaaligu ay ka hirgashay xafiisyada dawladda, sandulle ayey iska noqotay in lagu fakiro halkaas in laga sii talaabsado oo Soomaali wax lagu barto”* ayuu yidhi barre sare Maxamed Bulaale

Golihii wasiirada ayaa go’aansadey inay xilka hawshan dusha ka saareen wasaaradii waxbarashadu. *“Marka la isku soo xoorsho waxbarashada dugsiyadu in ay noqoto Af Soomaali waxa ay ku timi go’aan siyaaseed. Waxayse ku hirgashay go’aan maamul oo Wasaaradda Waxbarashadu ku dhaqaaqday in manaahijta loo tarjumo Soomaali, buugaagta casharada(text-books) iyaguna noqdaan Af Soomaali”* ayuu mar kale yidhi barre sare Maxamed Bulaale.

Wajigii ugu horeeyey ee hirgalinta fartu qaab olole midaysan ayuu ku hirgaley. Hase yeeshee wajiga labaad wuxuu culayska wayni dusha kaga dhacey aqoonyahanadii ka

hawlgalayey wasaaradii waxbarashada. Waxaana la doortay guddiyo kala duwan oo buugaagta casharada ee waxbarashada dalka dhamaan lagu af celiya af-Soomaali.

Shirar badan ayey wasaarada waxbarashadu ka yeelatey hawlgalinta iyo fulinta hawsha culayskaa leh. Wasaaradii ayaa go'aansatay in qaab dhismeedkeeda ay hawsha ku fulinayso la sameeyo. Sidii loo sameeyey qaabdhismeedka hawshaasina wuxuu ahaa sida uu nala wadaagey barre Sare Maxamed Bulaale:

1. Waaxda Kowaad: Waxbarashada Asaasiga
2. Waaxda Labaad: Waxbarashada Dugsiyada Sare, Tacliinta Sare, Waxabarashad Dadka Waaweyn iyo Manaahijta - Agaasime: Ibraahim Maxamuud Abyan.
3. Waaxda Qorshaynta; Agaasime: Cabdiraxmaan Cabdille Cismaan (Shuuke)
4. Kormeerka Guud- Waxaa gudoomiye looga dhigay Barre Sare Maxamed Bulaale, iyadoo uu agaasime guudna ka ahaa Marxuum Maxamed Xasan Aadan (Gahayr) oo isaguna u warbixinayey wasiirkii waxbarashada.

Waaxaas la magacaabey waxay fududeeyeen hormoodna u noqdeen in la aburo guddiyo buug qoraal. Waaxahaas waxaa loo kala igmadey xilal kala duwan halka waaxda Labaad ay xilka guud u xilsaarneyd, socodsiinta hawshana waxa yeeshay Xafiiska Manaahijta oo uu madax ka ahaa Saleebaan Maxamuud Aadan (Saleebaan Gaal), iminkna ah Gudoomiyaha Golaha Guurtida ee Somaliland.

Shir ay dhamaan waaxahaasi iskugu yimaadeen ayuu shir gudoomiye ka ahaa Agaasimihii Guud, Marxuum Maxamed Xasan Aadan (Gahayr). Shirkaasi ayaa arinta dhan walba loo rogogay layslana gartay in la soo xullo gudiyaada qorista buugaagta casharada (Text Books). Gudiyaada waxaa xulistooda lagu saleeyey iyadoo loo qaybiyey maadooyinka kala duwan ee waxbarashada sida:- Aqoonta Xisaabta, Aqoonta taariikhda, aqoonta juqraafiga, Aqoonta Sayniska (Bayoloji, Fisigis, Kimistari), iwm.

Barre Sare Maxamed Bulaale oo arintaa ka hadlaya ayaa yidhi: *“Markii gudiyaada la magacaabey, waxaa mar kale heshiis lagu gaadhey in gudi kasta loo magacaabo gudoomiye. Tusaale ahaan gudida aqoonta taariikhda waxaa gudoomiye looga dhigay Cabdiraxmaan Carte Qaalib, iwm. Gudoomiyeyaashu waxa ay ka soo talabixin jireen xubnaha guddiga, xafiiska manaahijta isna waaxda labaad ayaa uu u gudbin jiray xubnaha la isla garto, markaas dabadeed ayaa agaasimuhu gaadhsiiin jiray Agaasimaha Guud Marxuum Maxamed Xasan Aadan Gahayr”*.

Gudiyaada la magacaabey ayaa sidoo kale gudida aqoonta xisaabtana waxaa gudoomiye u noqday Barre sare Maxamed Bulaale. Kulan dhex maray gudoomiyayaasha waaxda labaad, madaxa manaahijta, gudoomiyaha kormeerayaasha, kormeerayaasha iyo agaasimaha guud ayey ka soo baxeen magacaabista xubnaha gudiyaada. Sidoo kale waxaan marna maanka ka baxeyn kaalintii laxaadka laheyd ee ay Kulliyadda Waxbarashada

Lafoole ka gaysatey hawshaa hirgalinta qorista Afka iyo baahintiisaba. Waxay aheyd kuliyaadaasi isha lagu doogsadey ee soo saartey barreyaal tayo iyo tiraba leh. Kuliyaada waxaa ka hawlgalayey badiba xubno ka soo jeeda dalka haatan ah Soomaliland. Tani waa arinta horseedka u noqotay loona tiriyo in xukuumadii Afweyne u hawlgasho ka shaqeynta sidii tayo ahaan, dhaqaale ahaan, iyo jiritaan ahaanba loo tirtiri lahaa Kuliyaada Lafoole. Si reer Soomaaliland hu' loogu saaro colaadaa ayaa Kuliyadii la dhisay ee dhaqaale iyo kartiba loo huray lagu magacaabay Gaheyr (IHUN) oo ka soo jeeday Soomaliland.

Barre sarre Maxamed Bulaale oo mar kale sii faahfaahinaya arintaa ayaa yidhi: *“Markii meel la isla dhigay xubnihii gudiyada lana sameeyey Waaxihii kala duwanaa ayaa waxaa dib loo eegay nidaamkii waxbarasho ee ka jiri jiray dalkii. labadii dal ee Somaliland iyo Soomaaliya waxay kala lahaayeen laba hawlgal waxbarasheed, oo salka ku hayey hab waxbarasheedkii labadii gumaysi ee Ingiriiska oo Somaliland ku dhaqmeysay iyo kii Talyaaniga oo Soomaaliya ku dhaqmeysay”*.

Qaab Dhismeedkii Dugsiyada hoose, dhexe, iyo sare :

Dal	Dugsi Hoose	Dugsi Dhexe	Dugsi Sare	Wadar Guud
Soomaaliland	4 gu'	3 gu'	4 gu'	11 gu'
Soomaaliya	4 gu'	4 gu'	4 gu'	12 gu'

Guusha ugu weyn ee wax ka qabashada hawshaa waxaa loo tiriya dawladii rayidka aheyd ee uu Cabdirashiid Cali Sharmaarke (IHUN) madaxda ka ahaa, Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaalna (IHUN) uu ra'iisa wasaaraha ka ahaa. Dawladihii ka horeeyey ee rayidka ahaa waxay ku mashquulsanaayeen musuqmaasuqii hadheeyey iyo sadbursi raadin reernimo ku salaysnayd. Dawladaa ayaa nidaamkii waxbarasho ee dalkii ka dhigtay inuu ku midoobo nidaamka 4:4:4. Halka afkii waxbarasho ee dugsiyada hoose iyo dhexe lagu sargooyey inuu noqdo Af-Ingiriisi. Dugsiyada Sare waxay wali ku sii socdeen Af Ingiriisi dhinaca Soomaliland, iyo Af Talyaani dhinaca Soomaaliya. Waxaase gabaabsi sii ahaa dugsiyada sare ee Af Talyaani wax ku baran jiray.

Dugsiyadaa waxaa u yaalay manaahij ay u hogaansanaayeen. Sidaa darteed waxaa la isla qaatey in manaahijtaa sidooda loo daayo, hase yeeshee lagu kordhiyo barashada xiisada Af- Soomaaliga iyo xiisada Kacaanka. Dhawr kulan oo waaweyn ayaa la galay. Mid ka mid ah kulanadaa waxaa lagu qabtey dugsiiga Majistrale (Scoula Magistrale) loona bixiyey markii danbe dugsiiga sare ee Raage Ugaas. Go, aanadii lagu qaatey halkaa waxaa hormood u ahaa in buug Qoraalada la bilaabo. “Go’aan waxa uu isugu soo biyo shubtay in buug qoraalladu ka unkamaan min hoos ilaa sare oo laga bilaabo fasalka kowaad ee

dugsiga hoose laguna soo afjaro fasalka afraad ee Dugsiga Sare” mar kale ayuu sidaa yidhi Barre sare Maxamuud Bulaale.

Markii la isla gartey gundhiga laga dhaqaaqayo iyo gabagabadu siday ahaaneyso ayaa loo guda galay sida loo fulinayo hawsha .Waxaana lagu heshiiyey in maado (subject) kasta la qoro eray bixinteeda A-f-Soomaaliga ah.Mar kale waxaa la isla qaatey in fasal kasta loo qoro buug-casharaeed(Text_book).

Hawshii markii la gudo galay waxaa la raacey hab u dhigan sidan iyadoo laga duulayo in eray kasta oo Af-Ingiriisi ah la helo eray Af-Soomaali ah oo u dhigma:

1-Erayada si toos ah u leh eray tabin Af-Soomaaliya :

Tusaale :

Cell = Unug ; Average : Celcelis ; Addition =Isu-geyn ; Bisect= Kala badh;

Isle’eg toosan = *Square* : Laba-jibaar; *Inequalities*= Dheeliyada

Discriminant of quadratic equation: Takooraha Isle’egta Saabley.

2- Erayada Labaad waa qaar ku salaysan fikrad (concept)

Tusaale:

Compound interest: Dheefkor *Simple Interest* = Dheefta Fudud

differentiate =xig; *hypotenuse* =shakaal; sequence= susun; *vector* = leeb

xidid Maangad =*Imaginary root*;

3- Erayada laysla qaatey in sidooda loo daayo:

Tusaale :

Logarithm iyo *Trigonometry*, iwm.

4- Erayada la eego muuqaalkooga laguna saleeyo taasi eray-bixintooda:

Tusaale:

parabola =**saab**; *ellipse* = **qabaal**; *Rhombus*= **qardhaas**; *rectangle*=laydi ;

Isle’gta Saabley = Quadratic Equation ;

Aqoonyahan Maxamed Bulaale oo faahfaahin ka bixinaya sida mar walba dib loogu noqonayey dhaqanka bulshada ku hadasha Af-Soomaaliga oo hodana ayaa yidhi:



“Haddaad dhuuxdo, adhigu marka uu hayaamayo, iyo labadaraadle, marka uu aroorayo intuu is daboga lo ayuu susumaa. Aragtidaas ayaa, marka, keentey in “sequence” oo asal ahaan macnaha uu xambarsan yahay waxa midba mid daba socdo lagu tarjumo susun. Ereyo badan oo tarjumaada loo adeegsaday waxa lagala soo baxay aqal Soomaliga waxa uu ka kooban yahay ama weelka hoos yaala. Sidaasna waxa loo yeeley iyada oo alaabta aqal Soomaaligu ka koobmo ay muuqaal ahaan u e’g

yihiin shaxanao joomateri. Shaxanada qaarkood ereyga loo bixiyey waxa laga habraacay aqal soomaaliga qaab dhismeedkiisa Tusaale ahaan: “meridian” dhig ayaa la yidhi iyada oo laga eegey meesha ay dhigtu aqalka ka gasho. Ereyada miyiga laga keeney waxa ka mid ah “leeb” iyo “ligane” oo lagu kala bedeley vector iyo normal oo fisikiska iyo calculus labadaba ku jira. Maadaama uu vector loo qeexo in uu yahay xariiq jihaysan oo leh jiho iyo xajmi waxa la garawsaday in leebku uu leeyahay dhumuc iyo ganaf ($>$) tusaya jiho. Sidaas awgeed ayey, marka, u haboonaatay in vector lagu tarjumo leeb. Ligane sida loo qaatay xiiso ayey leedahay; Cayaar carruurtu cayaari jirtay (mooyi in ay imminka jirtoe) ayaa agabkeedua ahaa jajabyo eeriyo am bilaalayaal dhinac xardhan yahay dhinacna cadaan yahay. Jajabkaas ayaa la ruxruxaa oo dabadeed dhulka lagu sii daayaa. Haddii dhinac isku mid ah ay u dhacaan warfac ayaa la yidhaahdaa. Mararka qaar se waxa dhacda in midh ama ka badaniba ganaf isku taagaao oo uu dhiciwaayo. Marka ay sidaa noqoto, waxa la yidhaahdaa “ligan”. Maadaama normal uu xisaabta iyo fisikadaba yahay nooc perpendicular = qotome ah sidaas ayaa ,kolka, loogu bixiyey “ligane” ”

5- Erayada muuqaalka aan raacin ee dhaqanka looga meel dayey:

Erayadani waxaa runtii loo galay safaro badan oo marmarka qaarkood qatey muddo badan. Dhabar-adeyg ay muujiyeen aqoonyahanadaasi ayaa suurto galisay in ay guul ka gaadhaan. Waxaa la eegay qaab dhaqanka erayga shisheeye iyo fariinta uu gudbinayo ka dibna lagu sargooyey eray Af-Soomaali ah oo dhaqankeena raad ku leh lana jaanqaadaya erayga shisheeye iyo fariinta uu sidaba.

Tusaale :

-Erayga “ Area” : Runtii muuqaal la raaco lama helin eray si toos ah ula fanqaadana muu jirin. Sidaa darteed ayaa waxaa la ogaadey in Beeraleydu markay beerta qodayaan ay u isticmaal erayga “bed” baaxada beerta...

- Ereyga “Diagram” ma aha wax ku jira fikirka Soomaaliga; waxase jirta in kabooolayaashu inta aanay ruux kabo u tolin ay cagta ruuxa saan ku sargooyaan, taas oo la yidhaahdo jaantus. Sidaas ayaa, marka , ereyga *diagram* uu jaantus ku noqday.

Hawshani may fududayn hase yeeshee doonista aqoonyahanadaa iyo garashada ay u lahaayeen afkooga hooyo ayaa hirgaliyey in ay ku guuleystaan eray tabintaa ay u hawlgaleen. Kalsoonida uu qof ku qabo dhaqankiisa iyo afkiisa ayaa suurto galinaysa in qofkaasi si fudud ula jaanqaado dhaqan kasta, isagoon mar kasta ka badbaadaya dhaqan doorsoon. Taasi waxay muujinaysaa inay aqoonyahanadaasi aqoon fiican u lahaayeen Afka ay ka afcelinyaaan (Ingiriisada) iyo ka ay ku afcelinayaanba (Soomaali). Waxaa kaloo laga dareemayaa halkaa inay sidoo kale aqoon u lahaayeen fariinta uu erayga Afka Ingiriisidu xambaarsan yahay oo u suurto galisay inay si fudud uga afcelin karaan. Arimahan kor ku xusan ayaana keenayan in bulshada maanta joogat ka maagto afcelin ama si fudud u yidhaahdaan “Afkeena Soomaaligu lama jaanqaadi karo koboca aqoonta cusub”. Waxaa kale oo qofkaasi si geesinimo leh uga fogaanayaa ku dhawaaqida odhaahdaa kor ku xusan.

Waxaa maanka aqoonyahanka dareen dheeraad leh galinayan markuu dhex mushaaxayo qeexaha kala duwan ee ku soo arooray buugaagtii casharada ee xisaabta dugsiyada. Bal aan qaar ka mid ah ku xusno maqaalkeenana kooban ee la rabo inuu daahfur u noqdo dib u noolaynta iyo kobcinta afka hooyo:

DHARDHAARADA ISLE'EKAANSHDA

Ka soo qaad in b, t, j, iyo x yihiin tirooyin maangal ah.

- 1) **Isku noqod:** $b = b$
 - 2) **Wanqaaran:** haddii $b = t$ markaa $t = b$
 - 3) **Dhaxid:** haddii $b = t$, $t = j$ markaa $b = j$
 - 4) **Isku beddel:**
 - (i) **Haddii** $b = t$, $b + j = x$ markaa $t + j = x$
 - (ii) $b = t$, $bi = x$, markaa $tj = x$.
-

Xisaabta Fasalka 1^{aad} ee dugsiya Sare, Cutubka V, Dhardhaarada

Gunaanad ahaan ayaa waxaa mudan inaynu soo bandhigno qaabkii ay ku dhacdey in gudiyadaa kala duwan ay isla gartaan erayada laysla qaadanyo ee galaya buug cashareedyada dugsiyada hoose. dhexex iyo sare. mar kale aan marti uga noqono inuu Barre Sare Maxamed Bulaale faafreeb inoogu sameeyo sida gudiyadan hawsha u afmeeri jireen.

Waxaanu yidhi Barre Sare Maxamed Bulaale isagoo qodobaynaya:

“Arinta isku soo xoori oo erybixintu waxa ay ku timi:

1. Xubin kasta oo guddi ku jirtaa waxa ay badka soo dhigtaa ereyga ay la tahay in uu dhigmo ka Ingriisida. Is garabdhig iyo dood dabadeed ereyga guddigu u badato ayaa loo qaatay ka lagu tarjumayo ereyga Ingriisida ah;
2. In kasta oo xubnaha guddiyadu ay u badanaayeen Reer Somaliland oo weliba macallimiinta Laafoole ay ku dhowaayeen in ay ahaadaan reer Somaliland sooca ah, haddii ay dhacdo in laba erey oo Soomaali ah u wada qalmi karaan ku bedelidda ereyga Ingriisida codka ugu badanay kay xushaan ayaa la isugu daasan jiray;
3. ereyo badan ayaa maaddooyinka kala duwan ka dhexeey. Guddi waliba goonideeda ayey erey-bixin u samaynaysey, Xafiiska manaahijta ayaa ahaa xarunta erey-bixintu ku soo hoyan jirtay. Haddii si loo wada tarjumay erey ingriisa ah dhibi majirto haddiise khilaaf yimaaddo, maddaxa manaahija ayaa fadhiisin jiray gudoomiyeyaasha guddiyada erebixinta ee isku khilaafay xulashooda. Bartaas ayaa, kolka, lagu midayn jiray ”.

Inkastoo uu dadaal badani jiro oo aqoonyahan Cabdiraxmaan Faarax “Barwaaqo” uu qoray buug la yaab leh si baaxad weyn lehna u soo noolaynaya erayadii dhaqankeena ku jiray iyo dhaqanka laftigiisaba, waxaa lagama maarmaan ah in dawlad, aqoonyahan, iyo bulsho ahaanba loo gurmado afkeena hooyo ee aynu ku caano maalno.

Waxaan ku soo afmeerayaa qoraalkan maanso uu tiriyeey Jamaal Cali Xuseen iy erayadan oo qof waliba haboon tahay inuu raadiyo halkay kaga jiraan Xisaabta, loona mahadnaqo aqoonyahanadii u guntadey ee hawshaa xilka iska saarey.

Aljebra : Tibaaxaha Jibaarka Abyan , Iisirinta Tibxaalayaasha,

Joometari : Qoqobylo talantaali ah, Meer wadaag, Dhexfurka Koorta

Tirignoometari : Tusayaasha Fansaarada, Xaglaha dhacsan iyo kuwa kacsan,

Lakabeynta hooseeyaha laba tibix, yareynta heer xididshe , Susunno
iyo dareerinno.

Taladiina, tusaaleyntiina, tilmaantiina iyo ka qayb qaadashadiinaba waa la soo dhaweynayaa...

Hiddo lagu arooriyo

Ummad weliba luqadbay

Adduunyada ku leedoo

Rabbi baa asteeyee,

Af-Soomaaligeeniyo

Asal raaca dhaqankiyo

Ereyada suugaantuna

Astaan gaara weeyaan,

Maansadii Abwaan Jamaal Cali Xuseen

Raadraac:

-Mareegaha Baardheere,Farshaxan, Hadhwanaagnews, Oodweynenews,Gabileynews.

-Qoraal: Xeerka Abtirsiinta Erayga iyo sidaan u arko -

Qore: Cabdiraxmaan Faarax “Barwaaqo”

-Wareysi Bare Sare Maxamed Bulaale

Wareysi Qaade: Bahda Mareegta Farshaxan

- Garnaqsi Miisaanka Maansada

Qore:Fuaad Sheekh

-Wareysi Yuusuf Cabdi Ibraahim”Kolombus”

Wareysi Qaade: Bahda Mareegta Farshaxan

- Buug : Hal-bixinta Erayada Kumbuterka

Qalinkii : Cabdiraxmaan Faarax “Barwaaqo”

Qalinkii iyo Tifatirkii :

Fu,aad Sheekh

Bahda MareegTa Farshaxan

www.farshaxan.com ama www.farshaxan.org